

Miyaad maqashay?

Lacag Gaaraysa **\$4,824** – ama ka Badan – Ayaa Suuragal Ah In Aad Hesho!

Waxaad Xareysaa Canshuur Celinta Si Aad u Hesho Lacagta Aad Xaqa u Leedahay

Tixgelinta Dakhliga Shaqada iyo Canshuurta Tixgelinta Carruurta.


☞ Haddii aad shaqeysay sanadka 2008, oo ay carruur kula noolaayeen dakhligaaga shaqaduna uu ka yaraa qiyaastii \$39,000
AMA

☞ Haddii aysan carruur kula nooleyn oo uu dakhligaaga shaqada ka yaraa qiyaastii \$13,000

Waa aad u qalmi kartaa! Waxaad heli kartaa canshuur **BILAASH** ah oo lagugu caawiyo.

Waxaad IRS-ta ka wacdaa **1-800-829-1040** si aad wax dheeraad ah uga ogaato.

Si aad macluumaad dheeraad ah u heshid:



Lacagta Dakhliga Shaqada ee Laguu Xisaabinayo (ETC) iyo Lacagta Masruufka Carruurta ee Canshuurta Lagugu Xisaabinayo (CTC): Waxaa Laga Yaabaa in Lacag Yari Canshuurta Lagugu Yeesho Islamarkaana ay Canshuur Kaaga Soo Laabato IRS-ta!

- Haddii aad shaqaysay sanadka 2008 — waqti buuxa ama waqti dhiman — waa aad u qalmi kartaa.
- Xittaa haddii aan lagugu lahayn canshuurta dakhliga waa laguu xisaabin karayaa.

Haddii Aad Qabtay Carruur Kula Nool Muddo Badh ka Badan Sanadka 2008:

- Si aad u heshid EIC, carruurta waa in ay ka yar yihiin 19 sanadka 2008 (Ardada waqtiga buuxa waa in ay ka yar yihiin 24; carruurta naafada ah da' kasta ayeey jiri karaan.)
- Si aad u heshid CTC, carruurta waa in ay ka yar yihiin 17 sanadka 2008.

Haddii Aysan Carruur Kula Nooleyn:

- Waxaad sheegan kartaa EIC-ga haddii ay da'daada u dhaxeysay 25 iyo 64 sanadka 2008

Imisa Ayaan Heli Karaa?

Waa Imisa Lacagta Canshuurta La igu Xisaabin Karo ee Aan Heli Karayo?

Si aad u heshid EIC, haddii aad qabtid:	Dakhliga shaqada ee ka yar:	Waxaad sheegataa EIC illaa:
1 canug	\$33,995	\$2,917
2 canug iyo ka badan	\$38,646	\$4,824
Carruur la'aan	\$12,880	\$438
Si aad u heshid CTC, haddii aad qabtid:	Dakhliga shaqada ee ka badan:	Waxaad sheegataa CTC illaa:
1 canug iyo ka badan	\$8,500	\$1,000 canugiiba

Xadka EIC u dhigan ee dakhliga soo gala dadka xaaska ah waa \$3,000 iyo ka badan.

Maxaa Dhacaya Haddii Aan Jinsiyadda Mareykanka Qabin?

Dadka Soo Haajiray ee Shaqeeya ee Buuxiya Sharuudaha Waa ay u Qalmi Karaan.

- Si aad u heshid EIC: shaqaalaha, xaaskiisa iyo canug la sheegto waa in ay qabaan Lambarka Sooshal Sakuuritiga oo sax ah.
- Si aad u heshid CTC: Lambarka Sooshal Sakuuritiga ama Lambarka Aqoonsiga Canshuurta ee Shakhsiga (ITIN) ayaa loo baahan yahay.

Waxaad Xareysaa Canshuurta Dawladda Hoose Kaaga Soo Laabanaysa si Aad u Heshid EIC iyo CTC: Waxaad Heshaa Saacidaad Bilaash ah!!!

- VITA — Volunteer Income Tax Assistance (Gargaarka Dakhliga Canshuurta Bilaashka ah) — ayaa dadka si bilaash ah uga saacidda xareynta canshuurta.
- Kooxo bulshada ka tirsan ayaa ka shaqeeya VITA. Si aad u heshid meel kuu dhow, waxaad wacdaa 1-800-829-1040.

Haddii Aad Shaqeysid, Waxaad Heli Kartaa Lacagta Canshuurta Lagugu Xisaabinayo Islamarkaana Aadan ku Beelaynin Gargaarka Dadweynaha

Lacagta kaaga soo laabata EIC iyo CTC looma xisaabinayo dakhli ahaan marka aad dalbanaysid ama dib lagugu cusboonaysiinayo gargaarka cuntada, SSI, Medicaid, gargaarka lacagta, ama guryaha dadweynaha. Barnaamijyada gargaarka qaarkood waxaa ay qabi karayaan xad ku saabsan inta aad xisaabta bangiga ku haysan kartid lacagta canshuurta ee kuu soo laabanaysa.

Waxaad Awood u Heli Kartaa in Aad Qayb Lacagta Canshuurta Kaaga Soo Laabanaysa ku Heshid Jeeggaaga Shaqada

Shqaalaha qaarkood waxaa ay Hore Ugu Sii Heli Karaan Lacagta EIC jeegga shaqada iyo jeeg IRS-ta ay soo dirayso kaddib marka ay canshuurta xareeyaan. Waxaad foomka W-5 ee IRS-ta ka heli kartaa shaqadaada ama IRS-ta adigoo wacaya 1-800-TAX-FORM (1-800-829-3676) ama bogga internetka www.irs.gov.